



Matthew Bacon-Brenes oo ka tirsan PPS oo ku guuleystay abaarmarinta waxbarida ee qaranka

Matthew Bacon-Brenes, oo ah macallin wax la taliya isla markaana horseed ka ah u doodida barnaamijka habka waxbarid ee labada luqadood ee Dugsiyada Dadweynaha Portland, ayaa waxaa la siisay Abaalmarinta Horace Mann oo loogu talagalay Shaqo wanaaga Macallinka ee 2019-ka oo ka socota Ururka NEA iyo Horace Mann.

Bacon-Brenes wuxuu heli doonaa abaalmarin, isaga oo ka mid ah shan qof oo qaran ahaan, abaalmarin dhan \$10,000 bishii Febraayo lagu siiyay NEA Foundation Gala ee ku taala Washington, D.C. Shanta ku guuleysatay sidoo kale waxay ahaayeen kuwii iskugu soo haray kaalinta kama dambeysta ee loogu talagalay Abaalmarinta Faa'iidata Xubnaha ee NEA oo abaalmarin dhan \$25,000 prize lagu siin doono gala.

Jeff Morgan oo ka socda Horace Mann iyo John Larson, madaxweynaha Ururka Waxbarashada Oregon ayaa joogay goobta si ay abaalmarinta u siiyan Bacon-Brenes.

Waxay ahayd sanadkii labaad ee isku xiga oo Bacon-Brenes uu ku guuleysto abaalmarinta waxbarida oo weyn. Sanadkii la soo dhaafay, markii uu macallinka habka waxbarid ee labada luqadood ee Japanese ka ahaa Dugsiga Dhexe ee Mt. Tabor, wuxuu ku guuleystay Abaalmarinta Macallinka Sanadka ee Oregon oo ka socoda Waaxda Waxbarashada ee Oregon. Bacon-Brenes wuxuu ahaa hoggaamiye u oboleeya barnaamijyada habka waxbarid ee labada luqadood ee PPS kaasi oo ardaydu maaddooyinka ku bartaan Ingiriisi iyo luqad labaad.

“Waxaan hubaa in aan tamar badan ku bixiyay dejinta barnaamijka habka waxbarid iyo goobta gaar gaarka ah ee aan ka soo shaqeeyay,” ayuu sheegay Bacon-Brenes. “Waxaan wakhti badan ku bixiyay isku dayida ogaanshaha sida aad barnaamijkan habka waxbarid ee labada luqadood loogu dhigayo mid shaqeeyaa, isla markaana aan kaliya bixin luqad, balse bixiya maado.”

Bacon-Brenes wuxuu ku jiraa sanadkiisii 16^{aad} ee ku tirsan tahay PPS. Wuxuu wax soo dhigayay 29 sanadood, taasi oo ka soo bilaabanta 10 sano oo joogay Dugsiga Sare ee Gladstone, oo ay soo raacday saddex sano oo barayay luqadda Japan. Sanadkan, wuxuu u wareegay xafiiska degmada ee PPS isaga oo noqday macallin wax la taliya, isaga oo isticmaalaya xirfadiisa si uu caawimaad uga geysto hagida macallimiinta da'da yar.

“Waxaan ka wareegay fasalka, taasi oo ahayd mid xiiso leh iyado oo ay tani tahay abaalmarin loogu talagalay qabashada shaqada wanaagsan ee dhanka waxbarida,” ayuu sheegay. “Aad ayaan u jeclahay. Waa hab aan khibradayda ugu qaadayo fasalka isla markaana u caawinayo dadka kale ee soo gelaya xirfadda”

Uruska NEA waa hay'ad samafal oo ay aasaaseen macallimiintu si loo wanaajiyo waxbarashada dadweynaha. Horace Mann waa shirkad dhanka adeegyada dhaqaalahaa oo macallimiinta siisa xal dhanka caymiska iyo hawlgabnimada ah.